

map . ' F

Monitoring- und Anlaufstelle für vorläufig aufgenommene Personen

Map-F Kormeerka -iyo Xiriirka

Dadka Ka soo qaxay dagaalada, Abaaraha, Tacadiyada Siyaasadeed, Dawlada Switzerland (Iswiserlanr) waxay siisaa sharciga ku meel gaarka ah ee F.

Marka loo fiirsho is badalka sharciga Qaxoontiga F ta la siiyey ma ah kuwo hadda xaq u leh daryeelka Bulshada, Waxa kaliyee ay heli doonaan samafal magan galyo (Asylfürsorge) (Daryeelka Nabadgalyo soon). Taas macnaheedu waa in laga jaro ama laga dhimo saddex qaybood Boqolkiiba wax Ka badan Daryeelka caydha Qaxoontiga.

Dhimida ama yaraynta caydha Qaxoontiga F ta la siiyey xaaladoodu way Ka sii daraysaa ama xumaanaysaa dadka haysta F ee uu sharcigan cusubi saamayn doon. Dawladaha hoose (Gemeinde) Waxay joojin karaan bixinta lacagta barasha afka Germanka, Daryeelka aasaasiga ah sida Cuntada, Dharka iyo Alaabta Nadaatada waxa la dhimi doonaa Boqolkiiba Soddon. Dawladaha hoose (Gemeinde) iyagaa go'aamin Kara qadarka lacageed (Beesada) ugu badan ee Guryaha lagu ijaarto (kiraysto). Xaaladaha Qaarkood waxay Ka dhigan tahay Qaxoontiga F ta haysta in duruuftu ku qasbaysaa in ay wadda ijaartaan ama wada dagaan Guryaha sababtoo ah lacagtii ama (Beesada) Guryaha lagu kiraysto oo sharci cusubi yaraynayo. Isbadal Ka sharciga cusubi waxa uu abuurayaa saamayn weyn run ahaantii dadka haysta F. Dawladaha hoose (Gemeinde) go'aamada iyagaa u madax banaan sida aya u caawinayaa dadkan haysta F.

Konton Zürich (Gobolka surikh) Wuxuu soo saaray talooyin ku saabsan sida loo hir galinayo sharciga cusub, Lakiin talooyin ma'aha kuwo qasab ah.

Sababtan darteed ayaa loo aasaasay Ururka Map-F.

Map-F waa urur sinidaam ah u diwaan galinaya sida ay Dawladaha hoose (Gemeinde) ay ugu dhaqmaan sharciga cusub.

Map -F waxay falanqayn doonaan sida Dawladaha hoose (Gemeinde) Qaxoontiga F haysta dhiiri galinta u sameeya (intergeration) iyo kuwaan bixin (intergeration) sababtoo ah sharciga cusub. Map- F waxay bixisaa la talin loogu talo galay Dadka (Qaxoontiga) F haysta ee sharcigan cusub saameeyey si ay u taageeraan iyaga una helaan Faa'iido (benifits) ay u Qalmaan.

Ururka Map-F waxay rabaan in ay kor u qaado wacyi galinta dhibaatooyinka kala duwan we sharcigan cusub Ka soo bixi kara, Waxayna isku dayi doonaan in ay saamayn ku yeeshaan habka ay Dawladaha hoose (Gemeinde) u fuliyaan sharciga cusub iyo kala duwanaasha Dawladaha hoose (Gemeinde).

Si hadafka loo gaadho, Map-F waxay u baahan tahay warar xog ah ama macluumaad ku saabsan hir galinta ama dhaqan galinta sharciga cusub sida ay u hirgaliyaan Dawladaha hoose (Gemeinde) ee Zürich. Hadii uu sharciga cusubi ku saameeyey , Fadlan nala soo xidhiidh si aanu u ogaano dhibta ama aad garanayso Qof ama dad uu sharciga cusubi dhibaateyey. Waad nala soo xidhiidhi kartaa si aanu dhibta u ogaano.

map . ' F

Dienersstrasse 59,
8004 Zürich
Tel: 077 520 92 93
www.map-f.ch
info@map-f.ch